



Safarka dugsiga



Samtrans waxa ay takhasusu u leedahay sameynta, maareynta iyo habeynta safarada. Waxay inaga macaamiisha ah, dalbadayaasha bixiyayaasha qandaraas bixiyayaasha iyo hay'ada ka masuulka ee hawsha sidan oo kale ah qabanaaya ina siinaysaa fursada aynu ku helayno rajadeena, dalabkeena iyo baahideena.

Heshiiska iyo rajada

Kamuunka iyo/ama dugsiga ayaa bixiya oo dalbada safarka dugsiga. Masuuliyada Samtrans waxa weeye inay qaadaan ardeyda si ay u gaadhaan halkaas wakhti uu cida dalbatey rabto in la joogo halkaas. Qorsheynta safaraka dugsiga waxa uu dhacaa sida ku dhisan xiliga ay ardeydu dugsiga tahay inay joogaan. Xiliga la soo qaadaayo ayaa sidaas darteed kala duwanaan kara maalinta maalin taas oo ku xidhan inta ardey ee raacaysa dafada maalintaa taagan.

Safarka dugsiga waxa uu la mid yahay ka wareega baska oo kale taas oo aanay jirin fursad uu haysto dirawalku inuu ku galo oo uu ardey soo qaado.

Si ay u shaqeyso inay dhamaan ardeydu dugsiga wakhti ku yimaadaan waxa muhiim ah inay ardeydu diyaar safarka u yihiin oo ay dibada taagan yihiin marka uu safarka dugsiga meesha taagan yahay. Waa masuuliyada qofka waalidka ama shaqaalaha dugsiga tagista iyo ka imaanshaha gaadhiga safarka dugsiga.

Marka ay jirto habsanka weyn dirawalka ayaa soo wacaaya isagoo wargalinaaya marka qaaditaanka la rajanaayo inuu bilowdo. Waxa muhiim ah inuu jiro telefoon lambar guriga ah ama ardeyga ah si aan idiin soo war galino habsnka dhici kara.

Joojinta iyo badalida safarka

Joojinta safarka waxa la sameynayaa sida ugu dhakhsaha badan oo la ogyahay inaanu ardeygu safreynin. Hadii laga bixiyo safarka xili ka danbeeya wakhtiga uu heshiisku dhigaayo waxa lagcag bixiyaha lagu soo dalacayaa safarka oo dhan. La xidhiidh xidhiidhiyaha safarka ee dugsiga si aad u ogaato heshiiska xiliga ka bixida ee aad idinku leedihiin.

Si aad uga baxdo safarka waxa uu masuulku ilmahu isticmaali karaa adeega sida Samtrans express iyo Samtrans KundWebb ama soo wac xarunta dalabka ee Samtrans. Badalida safar lagu ogolaadey waa in qoraal lagu sameeyo ugu yaraan saddex maalmood intaanu safarku dhicin.

Samtrans waxay bixinaysaa safarada dadka leh baahida gaarka ah oo ay qanadaraas ka haysato kamuunka, degmada iyo cida baraa'iyad uga dalbanaysa. Dhamaan baabuuryadu waxa ku xidhan xadhiga khamriga. Amaano, badbaadada safarka iyo bayada ayaa ah ahmiyadayada koowaad.



Samtrans KundWebb

Safarka ka fiiri internetka. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay waa kombiyuuter leh internetka.



Samtrans express

Waa khadka telefoonka kula hadlaaya oo aad had fudud oo aad telefoonka uga qabsaneyso ama joojineyso safarka jira.

Ka akhri wax dheeraad ah KundWebben iyo Samtrans express ee boggayaga: www.samtrans.se.

Halkaas oo aad dalban karto macluumaadka aad ku galayso.

Dabcan waad isticmaali kartaa labada khidmadoodba.



Nagala soo xidhiidh

Xiliga bilowga dugsiga waxa na soo waca dad badan iyadoo wakhti badan aad sugi karto. Waxa inta badan aad si ka dhib yar telefoonka nooga heli kartaa maalmaha shaqada saacadaha 10.00 iyo 14.00. Waxa kale oo aad nagala soo xidhiidhi kartaa emaylka: kundtjanst@samtrans.se.

Waxay xarunta dalabku furantey:

Malmaha shaqaa: 06:30-19:30
Sabtida-axada: 08:00-19:30

Xiliyada kale cajalada. Safarka waa la joojin karaa saacad kasta adigoo maraaya KundWebben ama Samtrans express.

Waxaad xarunta dalabka ka helay-saa tel: 08-522 500 00.



Macluumaad dheerad aah Samtrans

Macluumaad dheeraad ah oo Samtrans waxaad ka heli samtrans.se.

